JURIDISK RÅDGIVNING
FOR KVINNER

KU SOCOTA DADKA MAGANGELYO KA CODSADAY NORWAY

-Barashada sharciyada norwejiga

ASYLSØKERE I NORGE

- Somalisk -

HORDHAC

Buugan xambaarsan warxbixinadan waxaa ka soo shaqeeyay ururka dumarka ka caawiya sharciga ee marka la soo gaabiyo la dhaho JURK. JURK (ururka dumarka ka caawiya sharciga) waa urur madax banaan oo gargaar xagaa qaanuunka ah bixisa.Dadka ka shaqeeya ururkan waa haween qaanuunka ka barta jaamacada Oslo.Jurk (ururka dumarka ka caawiya sharciga) wuxuu siiya dumarka ama haweenka wadankan ku nool caawimo bilaash ah oo khusaysa sharciga.

Danta laga leeyahay warbixintan waxay tahay in la taabto su'aalaha qaanuuniga iyo su'aalaha soo noqnoqda ee badan dadka magangelyo doonka ahi is weydiiyaan**.**

Buugan "DADKA MAGANGELYO KA CODSADAY NORWAY" waxuu bixinayaa aragti kooban oo ku saabsan xeerarka waqtigan aan joogno, manaa aha mid dhamaystiran.

JURK (ururka dumarka ka caawiya sharciga) waxuu u mahad celinayaa NOAS, khaasatan Andreas Furuseth buugan akhriyay markaasna nagu soo kordhiyey talooyin fiican.

Mahadnaq weyna waxaan uu jeedinayna shaqaalihi ururka JURK (ururka dumarka ka caawiya sharciga) ee waqtigii deyrti 2007 ka shaqaynaysay qeybta qaxootiga, intay naga caawiyeen qorista buugan.
Kuwaas oo kala ah :
Diana Thorkildsen Hegland, Ruth Cecilie Dohrmann, Kristina Kvamme Nygård iyo Tina Storsletten Nordstrøm.

Oslo, janaayo 2008
Ingeborg Aas
Karianne Dyrø
Caroline Holm
Maryam Iqbal Tahir

QEYBAHA BUUGU UU KA KOOBAN YAHAY

Hordhac 2

BAABKA 1.AAD Sharciga ajnebiga 4

BAABKA 2.AAD Gacan qaad ama jir dil 7

BAABKA 3.AAD Guurka 9

BAABKA 4.AAD Sharciga ciyaalka 12

BAABKA 5.AAD Sharciga dhaxalka 14

BAABKA 6.AAD Sharciga ijaarka guri 15

BAABKA 7.AAD Sharciga shaqada 18

BAABKA 8.AAD Warbixino wax tar leh 22

8.1 Liiska xafiisyada kala gedisan ee aad la xidhiidhi karto
8.2 Cinwaanada buug kale oo warbixineed

BAABKA 1.AAD SHARCIGA AJNEBIGA

Goorma ayaan heli kara magangelyo?
Waxaad heli karta magangelyo hadii aad buuxiso shuruudaha qofka qaxoontiga ah.

Shuruudahan hoos ku qoran marku qofku buuxiyo ayuu noqonaya qaxooti :

1.In aad banaanka ka joogtid wadankaagi hooyo.
2.In ay jirto cabsi dabagal ah hadii wadankii hooyo lagugu celiyo.
3.Cabsida dabagalku waa in ay la socoto taag la'ii ama diidmo ee wadanki hooyo ay ka muujinayso difacaaga.
4.Waxyeelaha aad ka cabsoonaysid in ay ku gaadhaan waa inay noqdaan waxyeelo qatar ah hadii lagugu celiyo wadanki.
5.Khatarta laguu geysanayo, ama aad ka cabsanysid, waa in ay ku xidhan tahay qabiil, diin, dhalasho ama jinsi,xubinimo aad ka mid tahay koox gaar ah oo mujtamaca ah ama fikir siyaasadeed.

Dowlada Norway ayaa qiimeeysa go,aana ka gaarto in aad tahay ama in aadan ahayn qaxooti.Hadii aad buuxin waydo shuruudaha lagu helo qaxootinimada, waxaa isla markaas laguu eegi in aad heshid sharciga bini-aadamiga ah.Shuruudaha lagu helo qaxootinimada waa kuwo adag.

Sharci ma la, igu siin karaa hadii aan naftayda uu cabsanayo?
Taasi waa mid sharci lagu heli karo hadii aadan buuxin shuruudihi aad ku helaysay magangelyo, oo aad hadana wadanki hooyo ku noqon karin amni la'aan darteed. Norway waxaa waajib ku ah in ay ku siiso sharci aad ku joogtid wadanka hadii aad magan uu baahan tahay.Waxay noqon karta sababta aadan ugu noqon karin wadanki dagaal, cabsi in lagu dilo, in laguu geysto waxyeelo la xidhiidh-ta sababo aan ahayn kuwa qaxootinimada lagu helo.

Maa heli karaa sharci aasaaskiisu ban-aadamnimo ku salaysan yahay?
Hadii uu codsigaagu ka turjumayo tixgelin adag oo ban-aadamnimo, waxaa lagu siin karaa sharcigaas hadii aad weydo magangelyonimada. Tixgelintaasu waxay noqon kartaa in aan lagugu celin karin wadanki, sababtoo ah amni daro, cafimaad la'aan ama ilmaha dartood.Kuma xidhna in marxalado xun uu wadanki hooyo ku sugan yahay, tusaale ahaan faqri, gaajo iyo wax la mid ah. Mar kasta waxaa la sameyn doona qiimeyn guud oo ku saabsan dacwadaada. Sharciga bani-aadamnimadu waa mid sanadle ah. Waa laguu jadiidin hadii aad weli sidii uu buuxisid shuruudihi.

Maxaa laga wadaa fiisaha?
hadii aad ka soo jeedo wadan aan ahayn wadamada isutaga yurub (EU)ama wadamada reer yurub ku bahoobay ganacsiga iyo isu socodka alaabaha iyo dadka (EØS), oo aad rabtid in aad soo siyaaratid Norway, waa waajib in aad heshid fiise.Waxaa jira shuruudo adag oo ah in la buuxiyo si loo helo fiisaha.Hadii dowladu shaki ka galo in aadan ka bixi doonin wadankan markuu fiisuhu kaa dhacaayo, waad waayi karta fiisaha.Marka fiisaha lagu siiyo waa in aad ka baxdid wadanka marku dhaci rabo fiisaha.Xoog ayey u adag tahay in aad heshid fiise hadii dowlada shaki ka galo noqoshahaaga.Wadamo qaar way ku adag tahay helida fiisaha norwejiga marka loo eego wadamo kale.Fiisaha waxaa la siin karaa qoyskaaga iyo saaxiibadaada oo rabo in ay kugu soo siyaartaan Norway.Qofka rabaa in uu ku soo booqdo waa in fiisaha uu ka codsado safaarada ama qunsulka Norway ee wadanka aad joogtid.

Qoyskaygu sharci ma ku heli karaan Norway?
Marka aad degantahay Norway, qoyskaaga dhow way heli karaan sharci ku salaysan isu keenid qoyska.Qoyska dhow waxa laga wadaa tusaale : ilmaha aad dhashay ee ka yar 18 (sideed iyo toban) jir, xaaska iyo waalidiinta da'ada ah ee aan is bixin karin ee jooga wadanki hooyo.Qofku marku rabo in loo geeyo qof qaraabadiisa ah oo ku nool Norway, waa in uu qofkaasi ka soo dalbadaa safaarada ama qunsulka Norway ee dhulki hooyo ama wadankaas uu deganyahay. Sharciga la siinayo qofka sidaas ku yimi Norway waa sharci sanad leh ah.Waa loo jadiidinayaa markay mudadaas dhamaato hadii uu weli qofku shuruudihi sidii buuxiyo.

Waa maxay degenaashahu?
Degenaashahu waxuu ku fasaxayaa joogitaan intaad rabtid wadankan Norway. Degenaashahu uma baahna in la jadiidiyo sanad walba.Waxaad helaysaa degenaashaha markaad 3 (sadex) sano oo xidhiidh ah aad joogto wadankan Norway.Codsiga aad ku dalbanaysid degenaashaha waxaad u diraysa UDI
(Waaxda ku shaqada leh in ay ka baaraandegaan in sharciga la siiyo magangelyo codsadayaasha).

Maxaa la, igala noqon kara sharciga?
Nooc walba oo sharci ah wa lagaala noqon kara hadii ay kugu cadaato in aad warbixin khalad ah ku dartay dacwadaada.

Maa la iga saari karaa wadanka?
waxaa lagaaga saari Norway hadii aad dembi gashid, jabisid xeerka ajnebiga ama khatar aad ku noqotid amniga Wadankan Norway.Dadka dhalashadoodu norwejiga tahay ama dadka ku dhashay Norway kuwaas oo aan marna dhinac uga bixin wadanka, lagama caydhin karo wadanka.

Qaxoontiga bilaa degenaashaha:
Hadii aadan haysan degenaasho, waxaa dhici karta in lagaa saaro wadanka hadii aad geysatid fal dembiyeed keenaya xabsi ka badan 3 (sadex) bilood.

Qaxoontiga degenaashaha leh:
Hadii aad degenaasho haysatid, waxaa lagu eryi karaa ama lagaa saari karaa wadanka hadii aad geshid fal dembiyeed ciqaabtiisu yahay 2 (laba) sanadood ama ka badan.

Xidhiidh qaraabanimo:
Hadana iyada oo sidaas uu xaalku yahay, lagaa saari maayo wadanka hadii aad Norway ku leedahay xidhiidh qaraabanimo oo adag.Taasi kama dhigna in ay khalad tahay in wadanka lagaa saaro.Qiimeyntaasu way culus tahay wayna adag tahayin la dhaafo saarista hadii marka hore dembi dhaco.

Maxaa laga wadaa fal dembiyeed?
Hadii aad jebiso sharciga ganaaxa, waxay ka dhigan tahay waxaad ku kacday fal dembiyeed.Xatooyo, gacan qaad ama maandooriyaha oo aad hoos ahaan usoo geliso wadanka, ayaa tusaale fal dembiyeed ah.

Maxaa laga wadaa ku xadgudubka sharciga ajnebiga?
ku xadgudubkaasi waxuu noqon kara joogitaanka Norway qofka oo bila sharci ah, bixinta warbixin khaldan oo ku saabsan cadaynta aqoonsiga qofeed ama xaaladiisa-ba, iyo ku shaqaysiga bila sharci.waa lagaa saari wadanka aad si xun amase marar badan aad ku xadgudubto sharciga ajnebiga.Xitaa hadii lagaa gaadho celitaan, lagu celin maayo wadanki hooyo hadii ay dhibaato naftaada oo aad weydo ama khatar kale oo lagugu geysan karo bani-aadamnimada ka baxsan.Hadii ay dhibaatooyinkaaasi joogsadaan oo wadanku xasilo waa lagu celin karaa.

Ayaan la xidhiidh karaa?
-JURK (ururka dumarka ka caawiya sharciga)
-UDI (Waaxda ku shaqada leh in ay ka baaraandegaan in sharciga la siiyo magangelyo codsadayaasha).
-NOAS (Hay,ada norwejiga ah ee loogu talo galay
magangelyo codsadayaasha)
-SEIF (Xafiiska dadka aan uu dhalan wadankan iyo qaxoontiga ah isku caawiyaan)
-Advokatforeningen (ururka qareenada)

Waxaad buuga gadaashiis ka heli kartaa liis-ka taleefoonada iyo adraysyada qeybaha kala duwan ee aad la xidhiidhi kartid.

BAABKA 2.AAD GACAN QAAD IYO JIR DIL

Caadi miyaa gacan qaad iyo jir dil?
Waa fal dembiyeed Norway in lagu daqmo gacan qaad iyo jir dil.Gacan qaad waxaa laga wadaa tusaale ahaan dharbaaxo, ulaynta ama garaacid, feedh, handadaad, qol ku soo xidhid, taataabasho bila ogolaansho, ku khasbid qof in uu kula galmoodo ama kufsi.

Imisa jir baa la,iga doonayaa inaan noqdo sii aan galmo uu sameeyo?
da'ada ugu yar ee loo ogolyahay galmada waa 16 (lix iyo toban) sano.Taasi waxay ka dhigantahay in ay mamnuuc tahay la,galmoodka ilmaha da'adaas ka yar.Galmoodkaasi waxuu keenaa xabsi iyo wadanka uu laga saaro.waxaad la akhrisan karta celinta BAABKAA 1.AAD.

Labada is qabta miyay isku khasbi karaan galmada?
Labada is qabtaa midna midka kale kuma khasbi karo galmada. Qofka ayey uu taal in uu la galmoodo lamaanaha kale.

Xaasas badan mayeelan karaa?
Maya. Norwey sharci kama aha qofku inuu ku yeesho hal xaas wixii kabadan. Waa ganaax qofkii lagu qabto arinkaas. Qofku waa inuu cadeeyaa tii hore uu qabay inuu furay.

Maxaan sameyn kara hadii laa ii geysto gacan qaad iyo jir dil?
Hadii taasi kugu dhacdo, waa in aad ku war gelisaa qof aad aaminsan tahay. Waxuu noqon karaa dhakhtar-kaaga, baadari ama shaqaalaha xafiiska xerada qaxootiga.Waa in aad weliba aad booliska ka dacwaysaa sida ugu degdega badan.Hadii aad xerada qaxootiga banaanka aad ka joogtid waxaad aadi kartaa kuwa dadka ka caawiya dhibaatada ama daryeela qoysaska.

Maxaa dhacayaa hadii aan booliska u gudbiyo dacwad gacan qaad iyo jir dil?
booliska oo loo dacwoodo waxay keentaa in la mariyo sharciga qofki dhibaatada geystay.Dhibanahu waxuu dalban karaa qareen, dawladu ay dhiibto kharashkiisa. Waxayn taasi khusaysa danbiyada culus sida faro xumeen iyo marka dhibanahu loo arko in uu ubaahan yahaycaawimo qareen.

Dhibanahu waxuu dalban kara in la siiyo gargaar ku saabsan xaga qaanuun-ka, isaga oo aanan xaq uu lahayn qareen bilaash ah.Taasi waxay khusaysaa dacwadaha ku saabsan dhibaato ka timi qof dhow ama qaraaba ah.Dhibaatada waa in laga gudbiyaa sida ugu degdega badan.

Ma ka dalban karaa magdhow gacan qaad laa ii gesytay?
Hadii uu dhibanahu helin wa magdhow ah oo ka socota gacan qaadaha isago oo la mariyay maxkamad, hadana xaalka oo sidaa ah waxuu dhibanahu xaq uu leeyahay magadhow ka socota dowlada.Shardi kuu fududeedinaya helida magdhowgaas wuxuu ku xidhan yahay in dhibanahu dacweeyo gacan qaadaha. Waa in ay cadaataa in fal dembiyeed dhacay.Magta waxaa guud ahaan la bixiyaa marka dhaawacu kugu dhaco adiga oo jooga wadanka Noway.

Ayaan la xidhiidh kara?
-JURK (ururka dumarka ka caawiya sharciga)
-Krisesenter (Xafiiska gargaarka dadka tabaalaysan)
-Støttesenter mot incest eller seksuelle overgrep ((Xafiiska gargaar siiya dadka dadkoodu faro xumeeyeen ama dadka la kufsaday)
-Politi og medisinsk nødhjelp (booliska iyo caawimada caafimaad ee degdega ah)
-DIXI Ressurssenter (xafiiska dadka niyada loogu dhiso ee DIXI)

Waxaad buuga gadaashiis ka heli kartaa liis-ka taleefoonada iyo adrayskaa qeybaha kala duwan ee aad la xidhiidhi kartid.

BAABKA 3.AAD GUURKA

Maxaan samaynayaa markaan rabo in aan ku guursado Norway?
Wadanka Norway markaad rabtid in aad ku guursatid waa in aad 18 (sideed iyo toban) jir tahay.Ka hor guurka waa in ay labada qof tijaabo soo maraan. Tijaabadaas waxaa looga dan leeyahay in labada qofi xaq in ay is guursadaan. Kuwa heysta shanta lambar waxay heleyaan cadayn xafiiska diiwangelinta magaalada ay deganyihin. Waxaad ku guursan karta kinisada norwejiga ama bulsho diineedyada kale ee sharci u leh in ay bixiyaan waraaq meher.Waxaad kale oo aad ku guursan kartaa xafiis dawladeed, sida maxkamada ama duqa magaalada. Guurku ma dhici karo hadii aanay labada qofi heysan cadayn tijaabo, waxaa uuna noqonaya mid aan waxba ka jirin.

Ma khasab baa in aan guursado?
Maya.Norway adiga ayaa dooranaya hadii aad rabtid in aad guursatid.Qaar waxay doortaan in ay wada noolaadaan. Waxay ka dhigan tahay in ay labada qof wada noolaadaan iyagoo is qabin.Qaar-na waxay doortaan in ay keli noolaadaan, iyaga oo aan ilmo lahayn ama iyaga oo ilmo isku leh.

Miyaa la igu khasbi karaa guur?
Maya.Adiga ayaa dooranaya qofkaad guursanaysid.Waa mamnuuc in ilmaha yar iyo dhalinta loo diro wadan kale si loogu soo guuriyo iyaga oon raali ka ahayn.Hadii xoog lagugu guuriyay laguu keeni maayo lamaanaahaga.Weliba guurka khasab-ka ah noqon maayo mid maxkamadaha Norway aqoonsan doonto.

Ma yeelan karaa xaasas badan?
Maya. Norway xeerku waxuu kuu fasaxaya markaad hal xaas yeelato.Adiga ayaa iska leh qaraarka ah in aad la galmootid xaaskaaga.

Sidee ayay noqonaysa xaaladayda dhaqaaale intaan xaasley ahay?
Inkasta oo aad xaasley tahay, waxaad markasta uu madax-banaan tahay wax alle waxaad hanti uu leedahay iyo wax kasta oo qiimo kuugu fadhiyo. waxaad hanti iyo qiimo kuugu fadhiyo kaama qaadan karo xaaskaaga. Xaaskaaga kaama qaadan karo kumana dheeli karo waxa sida gooniga uwada leedihiin, isaga ama iyada. Xaaska kuma qaadan karo amaah magac mid labadooda ka mid ah iyagoon heshiis ku eheen.Labada is qabta waxaa saaraan waajib ah in ay isu gargaaraan xag dhaqaale.Tusaale ahaan hadii xaasku lacag badan leeyahay oo ay xaaskiisu waxba haysan , waa in uu xaasku ka daboolaa xaaskiisa cuntada, dharka, lacagta jeebka iyo int kale ba.Sidaas oo kale waxaa saaraan waajib kaas la midna ah lamaanaha kale hadii ay lacag badan leedahay, halka xaasku waxba ka heysan.

Ma kala tegi karnaa aniga iyo xaaskeyga?
Haa.Hadii aadna rabin lamaanahaaga, waxaad dalban kartaa kala tag.uma baahnid ogolaanshaha lamaanaha kale.kala tagu waa mudo ay labada lamaane kala deganyihin, mudadaas oo ay ka soo fikirayaan in ay is furaan.Markay labada lamaane ay kal deganaadaan ugu yaraan hal sano, waxuu mid kasta dalban karaa furitaan.Hadii mudadaas aad xaasley tahayay ku soo gaadho gacan qaad ama handadaad gacan qaad, waxaad dalban kartaa furiin adiga oon sugin mudada halka sano ee kala deganaashaha.Hadii ay jiraan ilmo ka yar 16 (lix iyo toban) sano, waa in ay labada qofi iskula kulmaan xafiiska qoysaska oo ay ku heshiiyaan intaa aan furiin dhicin.Dhexdhexaadinta looma baahna mar hadii dacwadu gaadho ama taalo maxkamada, hadii uu furiinku sabab uu yahay dhib loo gaystay mid ka mid ah lamaanayaasha.

Sidee loo kala qaybsanayaa alaabta, guriga iyo maalka labada qof ka dhexeeya haduu furiin meesha yaal?
Adiga iyo xaaskaagu waad ka heshiin kartiin idinka oo madaxbanaan sidii aad uu kala qaybsanaysiin hantidiina iyo maalkiina.Hadii aad ku heshiin waydaan, guud ahaan labada lamaane maalkooda waa loo kala qaybinayaa si is le'eg marka laga jaro deynta.Iyada oo ay sidaas tahay hadana waxaad dalban kartaa in laga saaro hantida gaarka ah aad uleedahay ka hor inta aan loo qaybin labada is qabo.Waxay noqon kartaa mulkida adiga kuu gaar ah, xuquuqda caymiska ama wax alle wixii qiime leh oo guurka ka hor aad lahayd, Weliba dhaxalka, hadiyadahii aad heshay mudadii guurkaaga ee aad ka heshay dadka kale oon ahayn lamaanaha kale, iyo mulkida iyo wax kasta qiime leh ee aad ka wada heshiiseen in aydaan kala qeybsan : waxay noqon doonaan gooni oo qebinta laguma dari doono.Heshiiska qeybintu waa inuu noqdaa mid qoran si uu cadayn u noqdo.Inkasta oo aad kala qeybsanaysiin maalka idiin dhexeeyay, hadana waxaad dalban kartiin aad dhinac ula bixi kartiin qof walbo hantideeda gaarka u ah.

Goorma ayaan dalban karaa kala taga iyo furiin wadankan Norway?
Waxaad dalban kartaa kala tag iyo furiin wadankan Norway hadii aadan wadan kale ka dalban furiin.Shardiga kale waxuu yahay in uu lamaanahaagu aad is furaysiin deganyahay Norway.Tusaale ahaan waxaad dalban kartaa furiin wadankan Norway hadii uu lamaanahu degan yahay Norway, ama adiguba aad degan tahay Norway oo aad soo deganayd labadii sano ee ugu danbeeyay.Deganaashaha waxaa laga Wadaa in aad ku nooshahay Norway iyo weliba in aad ku sii noolaatid wadanakan.Hadii aad ka timid wadan kale oo aad is lahayn ku noqo, waxaad caadiyan deganaasho ku haysata Norway.

Xeerarka la igu dhaqayo waa kuwee hadii aan kusoo guursaday wadan kale, furiinkuna ka dhaco Noraway?
Hadii uu furiinku ka dhaco Norway, waxaa lagu dhaqmayaa xeerarka norwejiga.Inkastoo furiinka lagu saleeyo xeerarka norwejiga, hadana waxaa dhici kara in xeerarka wadankii guurku ka dhacay lagu dhaqmo marka la eego qeybinta maalka.Xeerarka qeybinta maalka waxuu muhiimad yeesha marka lakala saarayo mulkida sidaa loo kala heleyo waqtiga furiinka.Marka la eego sharciga norwejiga waxuu dhigayaa in la isticmaalo xeerarka wadankii aad ku nooleedeen markii uu guurku dhacay, hadii aad si kale ku heshiin waydaan.

Ayaan la xidhiidhi kara?
-Jurk (ururka dumarka ka caawiya sharciga)
-Fylkesmann (Masuulka gobalka uu jooga dawlada)
-Familievernkontoret (xafiiska qoyska)

Waxaad buuga gadaashiisa ka heli kartaa liis-ka taleefoonada iyo adrayska qeybaha kala duwan ee aad la xidhiidhi kartid.

BAABKA 4.AAD SHARCIGA ILMAHA

Waa maaxay lacagta ilamaha bil walba uu labada waalid kani aan ilmuhu la noolayn uu kan kale siiyo kadib furiinka?
Labada waalid waxaa saaran waajib ah in ay masruufaan ilamahooda hadba intay awoodaan.Waajibkaasi wuu jooga xitaa hadii ay kala guuraan waalidku.waalidka kan aan la noolayn ilmaha, ayuu saaranyahay waajibka bixinta lacagtaasi.Lacagtaasi waxay waajib ku tahay aabaha marka uu qirto ama cadeeyo in uu dhalay ilmaha.

Sidee loo qeexi karaa aabanimada?
Hadii ay waalidku dhalaan ilmaha iyaga oo is qaba, waxuu aabahu aabo u noqonaya cunuga isla markaas.Hadii hooyada aan la qabin marka uu ilmuhu dhasho, lacagta ilmaha waxaa la saarayaa aabaha hadii uu qirto aabo-nimada sida ku qeexan sharciga ilmaha.Aabanimada waxaa tusaale ahaan lagu cadayn karaa iyada oo uu aabahu ku qoro magaciisa waraaqda la buuxiyo marku ilmuhu dhasho.

yaa qeexa lacagta ilmaha?
waalidiinta ayaa ku heshiinaya intay noqonayso lacagta ilmuhu.Heshiiskan waa in uu noqdaa mid qoran si uu unoqdo cadayn oo kale.Waalidiintu iyaga ayaa bedeli kara heshiiskii hore ama qiimihi hore ee lacagta iyagoo markasta qoraal ku dhigi doona heshiis kasta oo ay gaadhaan.Hadii waalidku isku afgaran waayaan intay lacagtu noqonayso, waxay iskula tegayaan ninka u shaqeeya dowlada hoose ee magaalada ay deganyihin.Ninkaas oo ku shaqo leh qiimeeyana lacagta ilamaha iyo in uu ka soo qaado lacagta waalidka kan bixinayaa hadii uu la meermeero.Caadiyan NAV (Xafiiska shaqada iyo samofalka) ayaa hawshaas ku shaqo leh.Hadii waalidku ay wadanooleyn laga soo bilaabo dhalashadii ilmaha, oo ayna ka heshiin lacagta, waxay noqonaysa in ay NAV (Xafiiska shaqada iyo samofalka) qeexdo lacagtaas iyaga oon cidna kala tashan.Waxaa weliba laga dalban karaa maxkamadaha in ay qeexaan lacagtaas markay dacwadu ku saabsan tahay mas'uuliyada waalidnimo iyo wada jooga ilmaha iyo waalidka.

Sidee loo dhigaa wada jooga ilmaha iyo waalidka?
Labada waalid kan uu ilmuhu la joogo ma,ehee kan kale ayaa xaqaasu khuseeyaa.Xeerkaasi waxaa lagu dhaqmaya hadii ay labada waalid ayna ku heshiin qofka uu lanoolaanaayo ilmaha. Xaqaasi wada joogu wuxuu ka imaadaa labada waalid oo is fahma qofka canuga uu la,noolaan doono. Hadii waalidiintaasi ku heshiin waayaan qofka canuga uu la,noolaan doono. waxay dacwadu hor tagaysaa maxkamada.NAV (Xafiiska shaqada iyo samofalka) waxuu codsadaa heshiiska wada jooga waana inuu ahaado mid qoraal ah si gogol dhig ugu unoqdo xaqani. Hadii uu ilmuhu la nool yahay labada waalid, waxaa caawimo dalban karo waalidiinta mid kamida ee labadaba mawada dalban karaan.Xeerka wada jooga iyo is aragu waxuu muhiimad uu leeyahay inta ay noqonayso lacagta ilmahu.

Xaq ma u leeyahay lacagta la,siiyo ilmaha ka yar 18 (sideed iyo toban) sano?
Lacagtaas waxaa la siiyaa waalidka leh ciyaal ka yar 18 (sideed iyo toban) sano.Lacagtaasi waa in ilmaha wax fiican loogu qabtaa.Waa waalidka hayo ciyaalkana masruufa ilmaha ayaa xaq u leh helida caawimadan.Masruufaha waxaa loola jeedaa waalid kani ay ciyaalku la joogaan ee ay la noolyihin.Lacagtaasi si loo helo waa in ilmuhu joogaan Norway.Waxaana jira xeerar la qeexay oo sheegaya ama ka bixinaya micne qof lagu sheegi karo in uu degan yahay ama ku nool yahay Norway.Ilmaha dalbaday magangelyo waxaa lagu tiriyaa ama loo arkaa in ay degan yihin Norway bisha ay helaan magangelyo ama sharci ay ku joogaan Wadanka.

Maa uu yeelan kara xaq in aan helo lacagta ilamaha ka yar 18 (sideed iyo toban) sano ee la kordhiyay hadii aan ahay waalid keligiis ilmo masruufa?
Wuu jira xaqa lacagtaasi bixinaya guud ahaan marka ay labada waalid ee ilmaha dhalay ayna is qabin ama ay kala deganyihin, iyo markay hoy wada qaybsadaan ama ay ku wada noolyihin guri.hadii labada lamaane mid ka mid ahi dhinto, waxuu waalidka kale xaq uu heleyaa lacagta la kordhiyay?

Ayaan la xidhiidhi kara?
-JURK (ururka dumarka ka caawiya sharciga)
-NAV (Xafiiska shaqada iyo samofalka)
-Familierådgivningskontoret (Xafiiska talo siisa qoysaska)

Waxaad buuga gadaashiisa ka heli kartaa liis-ka taleefoonada iyo adrayska qeybaha kala duwan ee aad la xidhiidhi kartid.

BAABKA 5.AAD SHARCIGA DHAXALKA

Norway Labada lamaane ma is dhaxli karaan?
Haa. Norway labada lamaane way is dhaxli karaan, iyadoon loo eegin lab iyo dhedig.

Maxaa loo laa jeeda xeerka dhaxal ku keli ahaanta?
hadii uu labada lamaane mid dhinto, kan kale waxuu dalban karaa in uu sii haysto dhaxalka isaga oo aan ku khasbanayn in uu la qeybsado dhaxal sugayaasha marxuumka (ama marxuumada). marka xeerka la tixraaco, sida tusaale ahaan ilmaha ay wada dhaleen oo kale.taasi ayaa la yiraahdaa dhaxal ku keli ahaanta.Hadii uu marxuumku (ama marxuumadu) uu dhalay ilma kale oo aan ahayn ilmaha ay isku dhaleen lamaanaha nool, ilmahaas oo ah ilmo marxuumku ka dhalay islaan hore. waa in kuwaasi ogolaansho siiyaan lamaanaha nool si uu dhaxalka ku keli ahaado.Ogolaanshahaasu waa in uu noqdo mid qoraal ah si uu cadayn u noqdo.Hadii ilmahaasi ay qaan gaadh ahayn, waa in dawladu bixisaa ogolaanshaha.Hadii aanay ogolaanshahu suurogalin, waa in lamaanahu la qeybsadaa dhaxal sugayaasha iyaga ah sida ugu degdega badan.Mararka ay dhaxal sugayaasha qaar dalbadaan qeybtooda dhaxalka sida ugu dhakhsaha badan, la xadidi maayo qodobka ku keli ahaanshaha dhaxalka marka loo eego dhaxal sugayaasha inta hadhay.lamaanaha nool wuu heysan kara dhaxalka inta soo hadha oo gooni uu noqon doonta.

Xuquuqda dhaxalka ilmuhu maxay noqonaysa?
Ilmaha marxuumku (ama marxuumadu) ka hadha waxay dalban karaan duunyada oo idil ee uu ka tagay marxuumku (ama marxuumadu) hadii uu marxuumku (ama marxuumadu) xaas ka tegin (ama marxuumadu ka tegin) ama aanu jirin wax waraaq dhaxalka kala xadidaysa.Dhedig iyo lab loo eegi maayo.

Labada wada nool iyaga oo aan is qabin ma khuseeya xeerka dhaxalku?
Maya.Labada wada nool iyaga oo aan is qabin isma dhaxli karaan marka qanuunka la eego.Labada wada nool iyaga oo aan is qabin oo ay sidaas tahay hadana wey qori karaan waraaq dhaxal oo xaq uu usiinaya in ay is dhaxlaan.

Ayaan la xidhiidhi karaa?
-JURK (ururka dumarka ka caawiya sharciga)
-Tingretten (Maxkamada koobaad)

BAABKA 6.AAD XEERKA KIRADA GURYAHA

Maxay tahay kiradu?
Kirada waxaa laga wadaa markuu qofi ijaarto guri oo qofi leeyahay.Qof i jaaranaya guri waxaa loogu yeedha kireystaha. Kan ijaara guri waa kireeye.

Waa maxay heeshiis kiro?
Waxaa laga wadaa heshiis kiro xeer ama shardiga dhigaya isticmaalka guri oo aad ka dhiibtid lacag. Waxaa jira heshiisyo kiro oo mudo cayiman ah iyo kuwo aan mudo aan xadidneyn. Heshiiska mudada cayiman la kala galo waxuu soconayaa mudada lagu heshiiyay umana baahno in la joojiyo marku waqtigiisu dhamaado maadaama uu waqtigi go'an yahay.Heshiiska aan xadidnayn waa in uu kireeyaha ama kiraystahu ay joojiyaan.

Sidee baan u geli karaa heshiis kiro
Heshiis kiro guri waxuu noqon karaa mid qoraal ah ama mid af ah. Xeerka guud ee sharciga Norwejiga waxuu dhigaya in heshiiska af lagu wada gaadho uu la dhigmo kani qoraal-ka ah, hase yeeshe si ay cadayn u noqoto waxaa haboon in uu heshisku noqdo mid qoraal ah. Adiga oo ah kireystaha waxaad xaq uu leedahay in aad heshid heshiis qoraal ah hadii aad rabtid.

Waa maxay dabaajigu?
dabaajigu waxaa laga wadaa lacag uu dhigu kireystuhu uu siinayo kireeyaha. Waxaa uu kiraystahu dhigayaa lacag laguna shubaayo bangiga. Bangiga ayaa kaa caawin doona samaynta furista xisabtaas. Waa mamnuuc in kireeyaha le siiyo lacagta dibaaji-ga ah oo uu xisaabtiisa ku shubto. Kireystahu waxuu helayaa dibaajigiisa lacagta oo kortay mudadaas marku heshiiska dhamaado, hadii uuna qof.Jebin heshiiskii kiro wuxuu noqon kara tusaale ahaan isagoon kiresytahu bixin ijaarki, ama uu waxyeelo uu geystay guriga.

Maxaa waajib ah oo ku saaran hadi aad kireeye tahay?
Kireeyaha waxaa saaran waajib ah in uu wareejiyo guriga isaga oo nadiif ah, waqtiga lagu heshiiyay iyo inuu siiyo furaha kiraystaha. Haddii adiga oo kireeye ah aad sidaas sameyn weydo, kireystahu waxuu dalban karaa inuusan kireesan guriga wuxuuna ka dalban karaa kireeyaha in uu buuxiyo waxii dhiman.

Maxaa waajib ah oo ku saaran hadii aad tahay kireystaha?
Kireystaha waxaa saaran waajib ah in guriga ilaaliyo mudada uu kireystay. Markaad kireysato soona degtid guriga, waa in aad fiirisaa in ay wax ka maqan yihin guriga oo aad u fiirisid waxaad ku wada heshiiseen. Hadii wax maqnaadaan waa waajib in aad ku war gelisaa kireeyaha.

Maxaan sameyn kara hadii wax ka dhiman yahay guriga marka loo eego heshiiski kireed?
Hadii wax ka maqan yahay guriga waa inaad ku wargelisaa kireeyaha.Kireeyahu waxaa xaq iyo wajiib ku ah in uu toosiyo ama saxa khaladaadka gurigu uu lee yahay. Hadii kireeyahu uu saxi waayo khaladaadkaasi wagtiga ugu haboon, waad saxi kartaa adiguba waxaadna dalban kartaa in lagaa dhimo lacagta ijaarka. dib baad ula noqon kartaa lacagta ijaarka adiga oo uqaadanaya kharashki ku baxay howshaas.

Goorme ayuu joogsanaya heshiiska kiro?
Waxay ku xidhan tahay mudada uu soconayo heshiisku, waqti go'an ama waqti aan xadidnayn.Kan mudada go'an uma baahna in la joojiyo marku u waqtigiisu dhamaado, kan kale aan xadidnayn waxaa joojin kara kiraystaha iyo kireeyaha-ba iyagoo mudo isa siinaya. Qeybaha kale hooseeya ayaad ka akhrisan kartaa intan in dhaafsiisan oo ku saabsan marku kireeyahu joojin karo heshiska kiro

Maxay ka dhigan tahay joojinta ama ka noqoshada heshiiska kiro? (Ka guuris)
Ka noqoshada heshiiska kiro waxay ku dhigan tahay heshiiskii kiro oo dhamaaday. Hadii aad ku heshiiseen waqtiga aad ka guurayso guriga waa in waqtigaas la tixgeliyo. Hadii aan lagu heshiin waqtiga aad ka guurayso wuxuu caadi ahaan noqonaya 3 (sadex) bilood. Waxay mudadaas ka bilaabmaysaa maalinta ugu horeysa ee bishaas ka noqoshada la dhiibay.Marku kireeyahu joojinayo heshiiska, waa in uu maraa dariqyo.Ka guurista waa in ay ahaataa mid qoraal ah, uuna qoraa sababaha keenay ka guurista Hadii ay ka noqoshadaasi ayna buuxin shuruudahaas waxay ka noqoshadaasi tahay mid aan waxba ka jirin.Waxaad la soo xidhiidhi karta JURK (ururka dumarka ka caawiya sharciga) ama kuwa kale oo bixiya caawimo xaga qaanuunka.

Kireeyahu ma dalban kara in banaanka la ii dhigo?
Si uu banaanka u dhigo kireeyahu kireeystaha, waa in kireeyahu keena sabab suuro gelinaysa in xoog la isticmaalo.Waxaa laga wadaa xoog isticmaalidan mid ah waraaq cadayn ah oo fasaxa u siinaysa kireeyaha (ruux dumar ah ama nin ha ahaadeen).Cadayntaasi waxay tusaale ahaan noqon kartaa qaraar maxkamadeed ama qodob ku yaal heshiiskii kireed oo fasaxayaa banaan dhigis.Sababta hadii ay cadayso in kiraystaha banaanka la dhigo waa marka ijaarki la bixin waayo.

Liiska qeybaha aad la xidhiidhi kartid
-JURK (ururka dumarka ka caawiya sharciga)
-Leierboerforening (Ururka kiraystayaasha)
-Huseiernes Landsforbund (Dallada guryoleyda)
-Husleietvistutvalget (HTU) (Xafiiska uu gar qaada kiraystayaasha iyo kireeyeyaasha)
-Jus-Buss (Waax ka kooban dhalinyar barata sharciga, bixiyana caawimo xaga sharciga sii bilaash ah).

Waxaad buuga gadaashiisa ka heli kartaa liis-ka taleefoonada iyo adrayskaa qeybaha kala duwan ee aad la xidhiidhi kartid.

BAABKA 7.AAD XEERKA SHAQADA

Ma shaqayn karaa aniga oo ah magangelyo doon?
Qof magangelyo doonka ah waxaa la,siiyaa waraaqda u ogolaanayso inuu norwey ka shaqeesan karo oo mudo go'an ah intaa ay dacwada magangelyo codsigiia laga gaadhayo go,aan.Hadana waxaa jira shuruudo badan oo lagu heli karo warqadaas oo kale.Waxaa ka mid ah in waraysigii ama interviyuu-gi uu qofku soo maray iyo iyada oon shaki ku jirin cadaynta aqoonsiga qofeed.Codsiga lagu dalbanayo waraaqda shaqada ee waqtiga go'an, waxaa loo dirayaa booliska. La soco inkasto aad heshid waraaqda canshuurta lagu bixiyo, in aysan ku siinayn xaq aad ku shaqaysatid.

Halkee ayaan ka heli kara shaqo?
Dad badan waxay shaqada ka helaan iyaga oo uu mara NAV (Xafiiska shaqada iyo Samofalka) ama xafiisyada shaqada.Waxaa kalo jira bog-yaal internet-ka ah oo badan oo aad ka raadsan karto shaqo.Sidaa www.nav.n iyo finn.no.

Xaq maa u leeyahay waraaqda heshiiska shaqada?
Waa in heshiis qoraal ah lagu siiyaa markasta oo shaqo lagu siiyo.Heshiiska shaqada waa in laga helaa warbixinta ku saabsan meesha aad ka shaqeen doonto, qiimaha mushaharka, waqtiga aad shaqaynaysid, fasaxa iyo mudada ay qaadanayso marka aad ku war galiso shaqo bixiyaha inaad shaqada ka tageeso.Hadii aan waraaqdaasoo kale lagu siin , waxaad la xidhiidhaysa xafiiska kormerka shaqada.

Xaq ma u lee yahay in aan helo mushahar?
Qof kasta oo shaqo haya waxaa uu xaq ulee yahay mushahar. Ma jiro xeer dhigaya mushahar-ka ugu yar in ka yar in lagu siiyo wadanka Norway. Shaqo walbo mushahar heshiis ah ayuu kuxiran yahay. waxaad markaas helaysa mushaharka aad ku wada heshiiseen.sidoo kale waxaad xaq u leedahay mushahar intaad tabobarka ku jirtid.

Waa maxay heshiiska lacageed?
Heshiiskani waxuu u dhexeeya urur shaqaaleed iyo dallad shaqo-bixiyeyaal oo ku saabsan sida mushahar-ka iyo shuruudaha shaqada.Hadii shaqo bixiyahu saxeexay heshiiskan, adigana wuu ku khuseeya waa hadii aad ka mid tahay ururka shaqaalaha iyo hadii kaleba.

Xaq maa uu leeyahay lacag dheeraad ah hadii aan shaqeeyo waqti ka badan waqtigii aan shaqayn lahaa?
Waqtiga caadiga ah ee la shaqeeyo ee xeerku dhigayo in uu dhaafo 9 (sagaal) saacadood malintii iyo 40 saacadood usbuuci. Waqtiga shaqo oo gaaban waa lagu heshiin karaa. Meelaha badankood waa caadi in la shaqeeyo 37,5(todoba iyo soddon iyo badh) saacadood usbuucii. Hadii aad shaqaysid waqti ka badan waqtiga aad ku wada heshiiseen shaqo bixiyaha, waxaad xaq u leedahay lacag dheeri ah. Mushaharka waqtiga dheeriga ah waxuu ugu yaraan kuu dul socod yahay 40%(boqolkiiba afartan) musharka-kaagi aad caadiyan helaysay. Waxaad kale oo aad heli karta hadii aad waqti dhaafsan waqtigagi shaqaysid in aad waqtigii dheeraad-ka ahaa in aad malinti mudadaas ka soo dhintid waqtigaagi shaqo oo aad hore uga baxdid shaqada maalintaas. Waqtiga dheeri-ga ah ee uu ku siin karo shaqo-bixiyahu waa mid xadidan.

Xaq ma uu leeyahay fasax iyo lacagta fasaxa?
Shaqaalayaashu waxay caadi ahaan xaq uu leeyihin 25(shan iyo labaatan) cisho oo fasax ah sanadki. Lacagta fasaxa waxay noqota mushaharki bishaas aad fasaxa tahay. Caadiyan lacagta fasaxa waxay u dhigantaa 10,2%(boqolki-ba toban dhibic labo) intii aad shaqaysay sanadkii hore.

Maxaa dhacaya hadii aan xanuunsado?
Hadii aad xanuunsan tahay waa muhiim in aad ku wargelisaa looshaqeeyaha sida ugu degdega badan. Mudada aad jiran tahay waxaad xaq uu leedahay lacagta jirada hadii aad shaqadaas aad haysay ugu yaran 28(sideed iyo labaatan) cisho. Lacagta waqtiga jirada la qaato waxay u dhigantaa mushaharkaagi oo kale.Waxaad kala xidhiidhi kartaa NAV (xafiska shaqada iyo samo falka) hadii uu looshaqeeyahu diido in uu bixiyo lacagta jirada.

Xuquuq maxaan lee'yahay hadii aan uur yeesho?
Kuma qasbanid inaad usheekto looshaqeeyaha uurkaaga mar kalaiya, balse waxaad ugu sheegeysaa si aayar ah si shaqo bixiyuhu u qorsheeyo fasax siintaada, maadaama ay mudo qaadan karto qaban qaabada fasaxu.maqnaanshaha ka badan 12(laba iyo toban) usbuuc waa in lagu wargeliyaa afar usbuuc ka hor fasaxa. Hadii uu maqnaanshahu ka badan yahay sanad waa in lagu war bixiya 12 (laba iyo toban) usbuuc ka hor.

Maa dalban kara fasax la xidhidha dhalashada?
Markay dhalasho timaado waalidku, hooyada iyo aabuhu, waxay xaq uu leeyihin fasax. Marka la isku geeyo waxay labada waalid qaadan karaan fasax sanad ah: Qof shaqaalo ah oo uur leh waxay xaq u leedahay in ay qaadato 12(laba iyo toban)usbuuc oo ah intay uurka leedahay ah.Mudada umusha aad tahay waxaad xaq uu leedahay in aad heshid lacagta waalidka.Si aad xaq ugu yeelatid lacagta waalidka waxaa shuruuda gaar ahi ay dhigayaysa in aad soo shaqaysay 6 (lixdii) bilood ee 10(tobanki) bilood ee ugu danbeeyay. Hadii aad uu heli waydo xaq lacagta waalidka, waxaad xaq u heli kartaa lacagta marka qudha la dhiibo ee dhalashada ilmaha ka dib la bixiyo. La xidhiidh NAV (xafiiska shaqada iyo samofalka) hadii aad intaas in ka badan aad rabtid in aad ogaatid oo ku saabsan lacagta waalidka.

Maxaan sameynayaa hadii cunugaygu jirado aniga oo shaqada aadi raba?
Qofka shaqaalaha ahi hadii uu ilmihiisu ama qof ka sii hayey uu jirado, waxuu xaq u heleyaa fasax uu kula joogo ilmihiisa. Xeerku wuxuu dhigaya in aad fasaxan qaadan karto ila iyo intu 12(laba iyo toban) sano noqonayo cunugu. Waxaad xaq uu leedahay fasax ilaa10(toban)Bari sanadkiiba hadii aad mid ama laba cunug leedahay.Hadii aad labo in ka badan dhashay waxaad xaq u leedahay ila 15(shan iyo toban)bari oo fasax ah sanadkiiba. Hadii aad kaligaa ilmaha haysid, waxaad labada marxaladoodba xaq uu leedahay 20(labaatan)bari ama 30(sodan) cisho sanadki.

Looshaqeeyahu ma iga caydhin karaa shaqada?
Looshaqeeyahu wuu ka caydhin kara shaqada hadii uu haysto sabab wax ku ool ah ama cad. Caydhintu waa in ay sabab ku timaadaa.Tusaale ahaan iyada oo isbedel lagu sameeyo xarunta shaqada, oo markaas la arko in lagaa maarmo. Shaqo joojintu waxay ka iman kartaa dhankaaga. Looshaqeeyahu tusaale ahaan wuu kaa caydhin kara shaqada hadii lagaa arko maqnaansho aan sharci ahayn waqtigi shaqada, maandooriye aad isticmaasho, shaqadaada aan isku toosneyn, adiga oo ku xadgudbay xeerkii kalsoonida ee ku saabsan in aadan ka sheekeen waxaad shaqada kusoo maqashay ama tuugnimo.Waxaa jira xeerar qeexaya sida ama qaab-ku loo caydhinayo qofka. Tusaale ahaan caydhintu waxay noqon karta mid qoran waxaana heli kartaa warbixin ku saabsan xaq aad uu leedahay in aad dalbatid wada hadal. Waxaad codsan kartaa in lagaa wargeliyo waxa keenay caydhinta adiga oo heleyaa jawaabta. Hadii aad is leedahay caydhintu waa mid khaldan, waxaad la xidhiidhi kartaa ururka shaqaalaha aad ka mid tahay ama JURK(Dadka ka caawiya sharciga dumarka)

Liiska qeybaha la xidhiidhi kartid
- JURK(Dadka ka caawiya sharciga dumarka)
- Arbeidstilsynets svartjeneste (Xafiiska kormeerka shaqada)
- Likestillings- og diskrimineringsombudet (LDO) (Xafiiska Sinaanshaha iyo la dagaalanka midab kala sooca)
-Norges arbeids- og velferdsforvaltning (NAV) (xafiiska shaqada iyo samofalka)

Waxaad buuga gadaashiisa ka heli kartaa liis-ka taleefoonada iyo adrayskaa qeybaha kala duwan ee aad la xidhiidhi kartid.

WARBIXINO WAX TAR LEH

8.1 Liiska xafiisyada kala gedisan ee aad la xidhiidhi karto

Arbeidstilsynets svartjeneste (Xafiiska kormeerka shaqada)
Taleefoon-ka: 815 48 222
Boga internet-ka: www.arbeidstilsynet.no

DIXI Ressurssenter (xafiiska dadka niyada loogu dhiso ee DIXI)
Taleefoon-ka: 22 44 40 50 (Oslo)
51 52 03 60 (Stavanger)

Fylkesmannen (Ninka Dawlada dhexe uu jooga gobolada kale)
Boga internet-ka: www.fylkesmannen.no

Huseiernes Landsforbund (HL) (Dallada guryoleyda)
Taleefoon-ka: 22 47 75 00
Boga internet-ka: www.huseierne.no

Husleietvistutvalget (HTU) (Xafiiska uu gar qaada kiraystayaasha iyo kireeyeyaasha)
Taleefoon-ka: 22 59 31 50
Boga internet-ka: www.husleietvistutvalget.no

Integrerings- og mangfoldsdirektoratet (IMDI) (Xafiiska isdhexgalka iyo mujtamacyaasha ku shaqada leh)
Taleefoon-ka: 24 16 88 00
Boga internet-ka: www.imdi.no

Leieboerforeningen (Ururka kiraystayaasha)
Taleefoon-ka: 23 15 74 00
Boga internet-ka: www.lbf.no

Likestillings- og diskrimineringsombudet (LDO) (Xafiiska Sinaanshaha iyo la dagaalanka midab kala sooca)
Taleefoon-ka: 800 41 556
Boga internet-ka: www.ldo.no

Krisesentersekretariatet (Xarunta wax lagaga qabto marxaladaha si kedis ah uu dhacaa ama waxii khatar ah)
Taleefoon-ka: 23 01 03 41
Boga internet-ka: www.krisesenter.com

Norges arbeids- og velferdsforvaltning (NAV) (Xafiiska shaqada iyo Samofalka)
Boga internet-ka: www.nav.no

Norsk Organisasjon for Asylsøkere (NOAS) (Haa'yada norwejiga ah ee loogu talo galay magangelyo codsadayaasha)
Taleefoon-ka: 22 36 56 60
Boga internet-ka: www.noas.no

Politi (Bilayska)
Taleefoon-ka: 02 800
Boga internet-ka: www.politi.no

Røde Kors (Laanqayrta cas)
Informasjonstelefon om tvangsekteskap Taleefoonka uu furan in lagu warbixiyo guurka khasabka ah): 815 55 201

Selvhjelp for innvandrere og flyktninger (SEIF) (Xafiiska dadka aan uu dhalan wadankan iyo axoontiga ah isku caawiyaan)
Taleefoon-ka: 22 03 48 30
Krisetelefon mot kjønnslemlestels(taleefoonka degdeg ah ee loogu talo galay ka hor taga gudniinka) : 46 86 50 00
Boga internet-ka: www.seif.no

Støttesenter mot incest og seksuelle overgrep (Xafiiska gargaar siiya dadka dadkoodu faro xumeeyeen ama dadka la kufsaday)
Taleefoon-ka: 77 65 20 44
Boga internet-ka: www.smiso.no

Utlendingsdirektoratet (UDI) (Waaxda ku shaqda leh in ay ka baaraadegaan in sharciga la siiyo magangelyo codsadayaasha)
Taleefoon-ka: 22 35 15 00
Boga internet-ka: www.udi.no

Utlendingsnemnda (UNE) (Waaxda qof marka loo diido sharciga uu rafcaan-ka uu diro)
Taleefoon-ka: 21 08 50 00
Boga internet-ka: www.une.no

Juss-Buss (Dhaliyaro bixaya gargaar xaga sharciga)
Taleefoon-ka: 22 84 29 00
Boga internet-ka: www.jussbuss.no

Jusshjelpa i Midt-Norge (Xafiiska bixiya caawimo xaga qaanuunka ee Badhtamaha Norway)
Taleefoon-ka: 73 51 52 50
Boga internet-ka: www.jusshjelpa.no

Jusshjelpa i Nord-Norge (Xafiiska bixiya caawimo xaga qaanuunka ee Waqooyiga Norway)
Taleefoon-ka: 77 64 45 59
Boga internet-ka: uit.no/jusshjelpa

Jussformidlingen i Bergen (Xafiiska turjum ka bixiya qaanuunka ee Bergen)
Taleefoon-ka: 55 58 96 00
Boga internet-ka: www.jussformidlingen.no

8.2 Cinwaanada buug kale oo warbixineed

Hoos waxaa ka heli karta liiska buug kale oo wabixineed oo uu soo saaray JURK (ururka dumarka ka caawiya sharciga).Kuwaas oo heli karta markaad nala soo xidhiidhtid.

- Arv (Dhaxal)
- Ektefellers rettsstilling (Xuquuqda lamaanayaasha)
- Erstatning fra staten (Magdhow laga codsado dawlada)
- Ferie og permisjon (waqtiga laga fadhiyo shaqada iyo fasaxa ruqsadaysan)
- Forliksrådet (Maxkamada dhibanahu iyo dhib gaystahu ku gaadhaan is af-garad iyo xal intaan la gaadhin is dacween)
- Helserettigheter i fengsel (Xuquuqda cafimaadka ee xabsiyada)
- Husleie (Ijaar)
- Håndtering av gjeldsproblemer (Ka dabaalashaday daynta)
- Innvandrerkvinners rettsstilling (Xuquuqda dumarka soo aan wadanka uu dhalan)
- Krav på lønn og feriepenger (Dalabka musharka iyo lacagta waqtiga fasaxa laga yahay shaqada)
- Kvinner og odel (Dumarka iyo dhaxalka dhulka)
- Kvinners rettsstilling ved overgrep (Xuquuqda Dumarka marka ay ku habsato fal dembiyeed)
- Oppsigelse, avskjed og permittering (Ka tegid shaqo, Ka caydhin shaqo iyo ka fadhiisin shaqo)
- Sameie (Xeer wada lahaanshaha)
- Seksuelt misbrukte barns rettsstilling (Xuquuqda ilamaha la faro xumeeyo)
- Småbarnsforeldres rettsstilling (Xuquuqda waalidka ilmo yar leh)
- Ugift samliv (Wada nolaanshaha aan ku xidhnayn guur)

JURIDISK RÅDGIVNING FOR KVINNER

(ururka dumarka ka caawiya sharciga)

Adrayska boostada:
Postboks 2691 Solli
0204 Oslo

Adrayska uu xafiisku ku yaal:
Arbins gate 7

Lambarka taleefoonka:
22 84 29 50

Lambarka faks ah:
22 84 29 51

Waqtiyada taleefoonka la qabto:
Mandag kl. 09.00 - 15.00
Tirsdag kl. 17.00 - 20.00
Onsdag kl. 09.00 - 15.00

Waqtiyada dadka iman karaan:
Tirsdag kl. 12.00 - 15.00
Tirsdag kl. 17.00 - 20.00

www.jurk.no

KONTAKT OSS

Telefon:
22 84 29 50

Postadresse:
Juridisk rådgivning for kvinner
Postboks 2691, Solli
0204 Oslo

Besøksadresse:
Arbinsgate 7

www.jurk.no

Utgitt med støtte fra Universitetsforlaget

Trykk: Tøyen Trykk AS